# Xarunta Joojinta (StoppCenter)

## –xiriir ammaan ah oo ka madax bannaan rabshad

Polisen

• LA TUHUNSAN YAHAY

**Xarunta Joojinta (StoppCenter)**
Drottninggatan 16 A, Eskilstuna
Tel. 016-710 81 20
E-post: socialforvaltningen@eskilstuna.se

## Waxaanu rabnaa in adiga iyo qoyskaaguba aad caafimaad qabtaan!

Waxaanu ka walaacsanahay xaaladdaada maadaama lagugu tuhunsan yahay dembi la xiriira rabshado ka dhacay qof aad xiriir dhow tihiin.  Waxaanu kuu fidinaynaa caawimoyo taageero si aad u beddesho hab-dhaqankaaga.
Keligaa ma tihid. Dad badan ayaa ku nool xiriiro ay rabshado ka dhacaan. Rabshaduhu waxay saameeyaan qoyska oo dhan, carruurta, iyo asxaabta ku xeeran. Dhaqan dembiyeedyada iyo rabshadaha ku jira xiriirka waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan: hanjabaada, garaacida, laadka, riixidda, xakameynta, kufsiga, tacadiyada galmada, aflagaadada/ku xadgudub, daba-galka (jir ahaan iyo/ama dhijitaal ahaan) ama waxyeellaynta hantida qofka aad lammaanaha tihiin.

Xarunta Joojinta (StoppCenter) – waxay ka hortagtaa rabshadaha ka dhanka ah xiriirka dhow waana iskaashi u dhexeeya booliska, adeegyada bulshada ee degmooyinka Eskilstuna iyo Strängnäs, Gobolka Södermanland iyo hay'adda daryeelka dembiilayaasha (Kriminalvården).

Waxaanu si wadajir ah uga shaqeynaa sidii loo joojin lahaa rabshadaha ka dhaca xiriirka dhow.
• Ma aqbalno rabshadaha ka dhex dhaca dadka isku dhow iyo inay carruurta dhibaato soo gaarto.
• Waxaanu rabnaa in adiga iyo dadka kuu dhow uu caafimaadkoodu fiicnaado oo aad ammaan ku noolaataan.
• Ma doonayno inay carruurtu ku koraan rabshado ka jira qoyska dhexdiisa.

Mas'uuliyadda in rabshaduhu ay joogsadaan had iyo jeer waxay saaran tahay qofka dhibaatada geysanaya. Haddii aad doorato dhaqan rabshadaha, booliska iyo hay'adaha kaleba waxay diiradda saari doonaan adiga. Dhaqanka rabshadaha wata wuxuu yeelan doonaa cawaaqib. Booliisku waa hay'adda baarta dembiga.

## Qaado caawimada aanu bixinno - nala soo xiriir!

Waxaanu kaa caawin karnaa inaad beddesho dhaqankaaga adigoo helaya taageero wadahadalo ah iyo daaweyn/xalkeeda. Waxaanu sidoo kale bixinnaa caawimo ku saabsan isticmaalka aandooriyaha/ mukhaadaraadka iyo arrimaha la xiriira guriyeynta iyo dhaqaalaha.

Xarunta Joojinta (StoppCenter) adiga ayaa mudnaanta lagu siinayaa.

## Na soo waca – waxaanu u joognaa idinka!

| | |
|---|---|
| Rabshadaha hadda socota ee degdeg ah | Wac SOS Alarm 112 |
| Talo bixin ama soo sheegid dembi | Booliska114 14 |
| Talooyin iyo taageero iyo/ama codsashada caawimada | Xarunta Joojinta (StoppCenter) 016-710 81 20 (maalmaha shaqooyinka)<br>Degmada Strängnäs 0152-291 00 |
| Baahi degdeg ah oo ku saabsan ilaalin iyo/ama talo iyo taageero | Heeganka adeegga bulshada (Socialjouren) 016-710 36 00 (Habeenkii & maalmaha fasaxa) |
| Khadadka taageerada qaran ee qofka la kulma rabshado | Khadka taageerada haweenka ee 116 016<br>Khadka taageerada ragga 020-80 80 80<br>Khadka taageerada ee dadka jinsigooda beddela 020-55 00 00 |
| Ururada ku yaala Eskilstuna iyo Strängnäs ee bixiya talooyinka iyo taageerada qofka la kulmay rabshadaha | Heeganka haweenka Moa (Kvinnojouren) 016-51 21 09 (Eskilstuna)<br>Heeganka haweenka iyo gabdhaha Måna 070-041 43 93 (Strängnäs) |
| Khadka taageerada ee loogu talagalay qofka rabshadaha geysta | **020-55 56 66** |

Eskilstuna kommun · STRÄNGNÄS KOMMUN · ÅKLAGARMYNDIGHETEN · REGION SÖRMLAND · KRIMINAL VÅRDEN